

Jamhuuriyada Federalka Soomaaliya

Dowlad Goboleedka Hirshabeelle
Xafiiska Madaxweynaha



Federal Republic of Somalia
Hirshabelle State
Office of the President

Ref: DGHSH/XMM/N/0121/18

Tr: 19/03/2018

XEER MADAXWEYNE Lr 121

Madaxweynaha Dowlad goboleedka hirshabeelle markii uu arkay qodobka 51aad farqadiisa 12aad ee dastuurka dowlad goboleedka Hirshabeelle.

Markii uu arkay baahida loo qabo in la helo sharciyo iyo xeerar lagu Maareeyo Maaliyadda Dadweynaha, xeer daqli iyo xeernidaamiyeyaashiisa, iyo in la helo xeer lagu dhiso Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Dowlad goboleedka Hirshabeelle.

Markii uu arkay qaraarka baarlamaanka uu soo saaray 18/02/2018 ee uu tirsigiisa yahay **GSHDDGSH/003/18** ee ku aadaanaa ansixinta sharciga Dakhliga iyo xeernidaamiyeyaasha 9aad 2018 iyo kan kale ee la soo saaray isla taariikhdaas ee uu tirsagiisa yahay **GSHDDGSH/004/18** ee ku aadan ansixinta sharciga lagu dhisayo wasaaradda maaliyadda 2018 iyo sharciga kale ee lagu ansixiyey sharciga maareynta Maaliyadda Dadweynaha 2018 oo isna tirsigiisa yahay **GSHDDGSH/005/18** ee la soo saaray taariikh 05/03/2018.

Madaxweynaha dowlad goboleedka hirshabeelle waxa uu xeeriyey in qaarada baarlamaanka ee

1. Sharciga Dakhliga Iyo Xeernidaamiyeyaasha 9aad 2018
2. Sharciga Lagu Dhisayo Wasaaradda Maaliyadda 2018
3. Sharciga Maareynta Maaliyadda Dadweynaha 2018

loo bedelo xeer madaxweyne maanta oo ay taariikhda tahay 19/03/2018
xeer lambar 121

Maxamed Cabdi Waare

Madaxweynaha Dowlad Goboleedka Hirshabeelle



Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya

Dowlad Goboleedka Hirshabelle

Afiiska Guddoomiyaha Baarlamaanka Dowlad
Goboleedka Hirshabelle



جمهورية الصومال الفيدرالية
ولاية إقليم هرشبييلي
مكتب رئيس مجلس النواب هرشبييلي

Federal Republic of Somalia

Hirshabelle State

Office of the speaker

Ref: XGBDGSH / 121/18: الرقم

Jowhar, 05th March 2018 التاريخ

Ku: Madaxweynaha Dowlad Goboleedka Hirshabelle

=Jowhar=

OG: Madaxweyne Kuxigenka Dowlad Goboleedka Hirshabelle

=Jowhar=

OG: Wasiirka Maaliyada Dowlad Goboleedka Hirshabelle

=Jowhar=

OG: Guddiga Maaliyada Qorsheynta iyo tirakoobka BDGSHH

=Jowhar=

OG: Xoghayaha Guud ee Golaha Sharci Dejinta Hirshabelle

=Jowhar=

Ujeedo :- Qaraarka Baarlamanka ee Anxisinta Sharciga Dakhlaga, Xeernidamiyaha 9aad 2018

Mudane Madaxweyne

Waxaan halkaan kugu soo gudbinayaa Qaraarka Golaha Sharci Dejinta Lr. GSHDDGSHH/003/18 ee 18-02-2018 oo Golaha Sharci Dejinta Dowlad Goboleedka Hirshabelle go'aan kagaaray Anxisinta Sharciga Dakhlaga, xeernidamiyaha 9aad 2018 oo halkaan ku lifaaqan isagoo Go'aamiyey qodobada Soo Socda

Qodobka 1aad

Ayadoo ay Goob joog yihiin Golaha 52 Xildhibaan Kalfadhigii 3aad fadhigiisa 11-aad ee 18-02-2018 wuxuu codeyn wadar oggol ah ku ansixiyey Sharciga Dakhlaga, xeernidamiyaha 9aad ee 2018 si ay u fududaato Qorshe Hawleedka Xukuumada

Qodobka 2aad

Hadaba Waxaan Mudane Madaxweyne Kugu wargelinayaa inaad Xeer Madaxweyne kusoo saarto Sharciga Dakhlaga, xeernidamiyaha 9aad ee la ansixiyey sanadka 2018 Si Waafaqsan qodobka 51aad Faqrada 12aad Dastuurka DGSHH Laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ee Dowlad Goboleedka Hirshabelle si waafaqsan Qodobka 43aad Faqrada 1aad si uu u noqoto Sharci dhaqan gal ah

Sheikh Osman Barre Mohamed

Gudomiyaha Golaha Sharci Dejinta Dowlada Goboleedka Hirshabelle



E-mail: office.speaker@hirshabellestate.so |

Mobile: +252615564141, +252615611016



Tix/GSHDDGSH/003/18

18^{da} febrayo 2018

Qaraarka Golaha Sharcidejinta DGSH

Kalfadhiga 3aad Kulankiisa 11aad.

DOWLAD GOBOLEEDKA HIRSHABELLE.

GOLAHA SHARCI DEJINTA DOWLAD GOBOLEEDKA HIRSHABELLE

QARAAR KUSAABSAN

Ansixinta Sharciga Dakhliga,Xeernidaamiyaha 9aad



JOWHAR 18,FEBRAYO,2018

Qaraarka Baarlamanka Dowlad Goboleedka Hirshabelle

Golaha sharci Dejinta Hirshabelle

Markuu arkay: Warqada Codsiga Madaxweyne kuxigenka Dowlad Goboleedka Hirshabelle tirsigeedu yahay DGHSH/XMKX/0018/018 ee 06/02/2018 oo kusaabsan in la ansixiyo Hindise sharciyedka kor kuxusan si ay u fududaato fulinta Qorshe Howledka xukuumada

Markuu arkay: Qodobka 33aad ee Xeer hoosadka Golaha sharci Dejinta kuna saabsan Habraaca Ansixinta Hindise Sharciyedyada

Markuu Dhageystay : Warbixinta Guddiga Maaliyada Qorsheynta iyo tirakoobka oo kusaabsaneyd falanqeynta Hindise sharciyedyadan oo ku taariikhsan 15-02-2018

GOLUHU WUXUU GUDDOONSADAY QODDOBADA HOOS KUXUSAN

Qodobka 1aad

Si waafaqsan Qodobka 33aad ee xeer hoosaadka Golaha sharci Dejinta oo xeerinayo Habraaca Ansixinta Hindise Sharciyedyada si ay u noqdaan sharci kadib ansixinta Baarlamanka.

Golaha Sharci Dejinta Kalfadhigii 3aad kulankiisa 11aad ee 18ka febrayo 2018 oo ay goobjoog yihiin **52** Xildhibaan codeynaya waxay sharciga dakhliga, xeernidaamiyaha 9aad 2018 ku ansixiyeen Cod furan:

Oggol: 46 (afartan iyo lix Xildhibaan)
Diiday: 2 (Labo Xildhibaan)
Ka Aamustay: 4 (Afar Xildhibaan)

JOWHAR 18, FEBRAYO, 2018



**Ansixinta Sharciga Dakhliga iyo Xeernidaamiyaha 9aad
Jadwalka oo ay soo Gudbisey Wasaraada Dowlad Goboledka
Hirshabelle ee sanadka 2018**

Guddoomiyaha Golaha Sharci Dejinta Dowlad Goboledka Hirshabelle

Tirada Xubnahada Codeysay 52: Oggol(46) Diidmo(2) Ka aamustay(4)

Guddoomiyaha Golaha Sharci Dejinta

Saxiixa Md.ne Sheikh Cusmaan Barre Mohamed



Taariikh 18th Febraury 2018

Qodobka 2aad


Meel Marinta Sharciga dakhliga, Xeerndamiyaha 9aad Jadwalka

Qaraarka Golaha oo ay kulifaaqan yihiin Dhamaan Dokumentiga kor kuxusan oo ah qayb qaraarkan kamida waxaa lagu soo saaraya xeer Madaxweyne Dowlad Goboledka Hirshabelle si waafaqsan Qodobka 51aad Faqrada 12aad ee Dastuurka Dowlad Goboledka Hirshabelle waxaana lagu soo saaraya faafinta Rasmiga ah ee Hirshabelle si waafaqsan Qodobka 43aad Faqrada 1aad ee Dastuurka Dowlad Goboledka Hirshabelle

Mahadsanid

M.ne Sh. Cusmaan Bare Maxamed

Gudoomiyaha Golaha Sharci Dejinta DGHSH.



Lifaaqyada:

- Codsiga Madaxweyne Kuxigenka Dowlad Goboledka Hirshabelle Lr. DGHSH/XMKX/0018/018 ee 06-02-2018
- Warbixinta Guddiga Maaliyada Qorsheynta iyo tirakoobta oo kusaabsaneyd falanqeynta Hindise sharciyedyadan oo ku taariikhsan 15-02-2018



**Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee
Soomaaliya**

Xeerka Dakhliga

**Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee
Soomaaliya**

2018

Tusmo

Qaybta 1aad.	Cinwaanka, Awoodda iyo Taariikhda dhaqan-galka:.....	4
Qaybta 2aad.	Hadafka.....	4
Qaybta 3aad.	Fasiraad.....	4
Qaybta 4aad.	Canshuurta Mushaaraadka.....	6
Qaybta 5aad.	Canshuur-bixiyaha.....	7
Qaybta 6aad	Go'aaminta Qiyaasta Qiimaha Mushaarka ama Dakhliga ganacsi.....	8
Qaybta 7aad.	Canshuur-dhaafka iyo Cabbirka ugu hooseeya	9
Qaybta 8aad.	Waajibnimada Is-diiwaangelinta iyo soo xareynta Xisaabaadka.....	10
Qaybta 9aad.	Bixinta Canshuurta	10
Qaybta 10aad.	Canshuurta dakhliga ganacsiyada.....	11
Qaybta 11aad.	Aqoonsiga Canshuur-bixiyaha, Qodobbo guud.....	11
Qaybta 12aad.	Heerka (nisbada) Canshuurta.....	12
Qaybta 13aad.	Lacag-bixin iyo risiidh.....	12
Qaybta 14aad.	Shati/laysan Ganacsi.....	12
Qaybta 15aad.	Canshuurta Hantida Magaalooyinka.....	12
Qaybta 16aad.	Canshuurta Shidaalka	14
Qaybta 16Aaad.	Canshuurta Dhalinta Korontada.....	14
Qaybta 17aad.	Ujuurooyinka Suuqa.....	15
Qaybta 18aad.	Shati/laysan iyo Diiwaangelin Baabuur.....	15
Qaybta 19aad.	Shatiga/Laysinka La-soo-bixidda iyo Goosashada Kheyraadka	16
Qaybta 20aad.	Xeer-nidaamiyeyaasha iyo Tilmaamaha/Amarrada.....	16
Qaybta 21aad.	Canshuur ka-qaadista NGO-yada, Sharikadaha Gaarka Loo Leeyahay iyo Hay'adaha Kale ee Maareeya Maaliyad/Sanaadiiq.....	17
Qaybta 22aad.	Ujuurooyinka Dekadda.....	18
Qaybta 23aad.	Ujuurooyinka Garoonka Diyaaradaha	18
Qaybta 24aad:	Wakiillada Dakhli-ururinta.....	18
Qaybta 25aad:	Wakiillada Dakhli-Ururinta ee La Aqoonsan Yahay	19
Qaybta 26aad	: Shaac-ka-qaadista Hantida (<i>Declaration of Wealth</i>)	20
Qaybta 27aad	: Xiriirka Lala Leeyahay Dowladda Federaalka ee Soomaaliya.....	20
Qaybta 28aad	: Canshuurta Waddo-marista (<i>Road User Tax</i>).....	20

Qaybta 29aad: Sirmimada Macluumaadka Canshuur-bixiyaha..... 21

Qaybta 30aad. Hirgelinta Heshiiska Gaarka ah ee mideynta kastamka iyo qiimaha canshuurta Jaadka iyo Sigaarka. 21

Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya

Xeerka Dakhliga Dowlad-goboleedka ee 2017

Qaybta 1aad. Cinwaanka, Awoodda iyo Taariikhda dhaqan-galka:

1. Xeerka waxaa lagu magacaabi karaa “Xeerka Dakhliga Dowlad-goboleedka ee 2018” waxaana uu dhaqan-galeyaa taariikhda uu saxiixo Madaxweynaha waxaana uu jireyaa ilaa uu ka buriyo (nasakho) Baarlamaanka. Waxaa laga hirgelineyaa dhammaan dhulka Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya.

Qaybta 2aad. Hadafka

2. Hadafka laga leeyahay Xeerka waa in lagu oggolaado daraaseynta/qiimeynta iyo ururinta canshuuro iyo lacago kale oo la qaadayo, iyo in uu oggolaado Xeer-nidaamiyeyaal iyo Amarro/tilmaamo uu soo saaro Wasiirka oo ku saabsan daraaseynta iyo qaadista canshuuraha iyo dakhliga kale, xuquuqaha iyo waajibaadyada canshuur-bixiyeyaasha, iyo arrimo kale oo la xiriira. Xeerkan waxaa uu ka hadlayaa canshuuraha, ujuurooyinka/khidmadaha, laysimada (shatiyada) iyo lacagaha kale ee la qaado ee soo socda ee ay soo rogi karaan Dowlad-goboleedka iyo Dowladaha Hoose:

- Canshuuraha ku fadhiya mushaaraadka ay bixiyaan ganacsiyada
- Canshuuraha dakhliga/iibka ganacsiyada
- Canshuurta dakhliga shakhsiga
- Canshuuraha hantida magaalooyinka
- Shatiyada/laysimada Ganacsiga
- Ujuurooyinka/khidmadaha Ammaanka iyo Nadaafadda Suuqyada
- Canshuuraha Shidaalka
- Canshuuraha Soo-saaridda Korontada
- Canshuuraha Diiwaangelinta Baabuurta
- Canshuuraha Marista Waddooyinka
- Shatiyada La-soo-bixidda iyo Goosashada Kheyraadka

Qaybta 3aad. Fasiraad

Xeerkan dhexdiisa, haddii aaney xaaladdu si kale ka dhigin, ereyadan iyo oraahahan soo socda waxaa ay lahaanayaan macnaha la kala siiyey:

“*Ganacsi*” waxaa loola jeedaa hawl dhaqaale oo ay ku jiraan shakhsi ama koox shakhsiyaad ah oo ujeedka laga leeyahay uu yahay in faa’iido laga helo; Ganacsi waxaa ka mid ahaan kara laakiin aaney ku koobneyn: ganacsiyada tafaariiqda, warshadeynta/wax-soo-saarka, tijaarada, adeegyada cuntada iyo cabitaanka, gaadiidka, beeraha, xirfadaha iyo adeegyada kale.

“*Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda*” waxaa loola jeedaa guddiga shaqaalaha rayidka ah ee Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya.

“Qiyaasta Qiimaha” waxaa loola jeedaa qiyaasta ay Wasaaradda Maaliyadda ku qiyaastey qiimaha mushaar, dakhliga/iibka ganacsi ama qiimaha hanti.

“Xeer la diidi karo” waxaa loola jeedaa Xeer-nidaamiye uu Baarlamaanku u haysto muddo cayiman oo uu kaga soo horjeesan karo (diidi karo) ka hor inta Xeer-nidaamuyuhu dhaqangal noqon.

“Shatiyada La-soo-bixidda iyo Gooshada” waxaa loola jeedaa shatiga lagu tilmaamey laguna qeexay Xeerkan ama sharci kasta oo kale ee u habboon.

“Qof shaqaale ah” waxaa loola jeedaa Qof ka tirsan Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda oo shaqaale u ah Hay’ad Loo Shaqeeyo.

“Dowlad-goboleedka” waxaa loola jeedaa Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya,

“Miisaanka Guud ee Gaariga” ama *“Cufka Guud ee Gaariga”* waxaa loola jeedaa miisaanka guud ee loo oggol yahay gaariga iyo rarkiisa oo ah inta Tan ee ku qoran dokumentiga diiwaangelinta gaariga.

“Mushaar Guud” waxaa loola jeedaa wadarta mushaarsiinta caadiga ah ee qof shaqaale ah oo ay ka mid yihiin gunnada waqtiga dheeriga ah, khidmadaha, iyo gunnooyinka, iyo lacagaha kale ee la siiyo, ka hor inta aan waxba laga jarin.

“Tilmaammo/amarro” waxaa loola jeedaa xeerar, buugaag, amarro, dhabbe-tuseyaal iyo ogeysiisyo

“Dowladda Degaanka/Hoose” waxaa loola jeedaa Maamul/Dowlad Gobol ama Degmo

“Wasiirka” waxaa loola jeedaa Wasiirka Maaliyadda ee Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya, ama saraakiisha wasaaradda ee awood gaar ah loogu wakiishey si waafaqsan waraaqda “awoodaha wakiilashada”.

“Baarlamaanka” waxaa loola jeedaa laanta sharci-dejinta, oo ah laanta la soo doorto ee dowladda ee mas’uuliyaddeedu tahay in ay matasho dadka soo doortey, sameynta sharciyada iyo kormeerka hawlaha dowladda iyada oo u mareysa dhegeysiyo iyo baaritaanno, ama ah sida loogu qeexay Dastuurka Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya.

“Liiska Mushaarka/Payroll” waxaa loola jeedaa qiimaha guud ee ujuurada ay cid loo shaqeeyo bixiso oo aan waxba laga jarin, ama qiimaha loo garto ee lagu qeexay Jadwalka laad ee xeerkan.

“Shakhsi” waxaa loola jeedaa qof kasta ama hay’ad shakhsiyad qaanuuni ah leh, oo ay ka mid yihiin sharikadaha, iskaashatooyinka, kambaniyada, shuraakooyinka,

mu'asasooyinka, ururrada, ganacsiyada la wada maal-gashado, hay'adaha ammaanada ama hanti/dhul.

"Madaxweynaha" waxaa loola jeedaa Madaxweynaha Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya.

"Urur/hay'ad Dadweynaha u Daneeya" waxaa loola jeedaa urur/hay'ad loo aqoonsadey si waafaqsan Xeerkan.

"Xeer-nidaamiye" waa xeer bixinaya xeerar faahfaahsan oo uu soo saaro Wasiirka Maaliyadda uuna ansixinaayo Baarlamaanka si loogu hawlgeliyo waxyaabaha uu dhigayo Xeerkan. Xeer-nidaamiyeyaashan waa kuwo ay waajib tahay in loo hoggaansamo.

"Canshuurta Waddo-marista" waxaa loola jeedaa canshuurta lagu sharxay laguna qeexay xeer-nidaamiye uu soo saaro Wasiirka isaga oo raacaya Xeerkan.

"Canshuur-bixiye" waxaa loola jeedaa shakhsi kasta oo ay tahay in uu canshuur u bixiyo si waafaqsan Xeerkan.

"Sanad-canshuureed" waxaa loola jeedaa sanadka taariikhiga/kalandarka.

"Dakhliga/libka" waxaa loola jeedaa wadarta badeecada ama adeegyada la iibiyey iyada oo aan wax laga jarin, ama qiimaha loo qiyaasey ee lagu cayimey Jadwalka laad ee xeerkan.

"Ujuurada Diiwaangelinta Baabuurta" waxaa loola jeedaa sida loogu sharxay looguna qeexay Xeerkan dhexdiisa;

Qaybta 4aad. Canshuurta Mushaaraadka

3. Canshuurtan waxaa lagu magacaabi doonaa Canshuurta Mushaaraadka.
4. Canshuur ayaa lagu soo rogayaa sanad kasta mushaarka buuxa ee la siiyo shaqaalaha ganacsiyada ku yaalla dhulka Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya.
5. **Heerka/nisbada iyo Qaddarka Canshuurta.**
 1. Qaddarka canshuurta sanad canshuureed kasta waa in ay noqotaa maxsuulka heerka/nisbada canshuurta lagu caddeeyey Jadwalka 3aad ee wareegtadan iyo mid un;
 - i. Haddii uu yahay ganacsi ay Wasaaradda u garatey in uu yahay Heerka A, qaddarka lacagta toddobaadka ama bisha loo wareejiyey shaqaalaha oo ah mushaar iyada oo la adeegsanayo hannaanka lacag-bixinta

elektaroonigga ah ee canshuur-bixiyaha ama, la amrey in lagu shubo xisaabta bankiga ee canshuur-bixiyaha. Ama

- ii. Haddii lacagta aan lagu bixinin hannaan elektaronik ah, qaddarka waa in uu shaaca ka qaadaa canshuur-bixiyaha, isaga oo keenaya xisaab lagu sameeyey hantidhowr. In uu si ku-meelgaar ah u bixiyo qaddarka lagu sheegey Jadwalka 1aad. Qoraallada mushaaraadka ee lagu sameeyey hantidhowrka waa in la soo bandhigaa ka hor inta uusan bilaaban sanad-maaliyadeedka soo socda.
2. Haddii uu yahay ganacsi lagu baadi-soocey in uu yahay Heerarka B, C, D ama E waa in lacagta sanadlaha loo bixiyaa si waafaqsan Jadwalka 2aad.
3. Racfaan: ganacsi lagu baadi-soocay in uu yahay Heerka B, C, D ama E waxaa uu racfaan ka qaadan karaa lacagta la saarey isaga oo bixinaya bayaan lagu kaabey qoraallo/dokumentiyo la caddeeyey. Racfaan waa in loo sameeyo si waafaqsan Qaybta 6B.
4. Heerka/nisbada canshuurta la qaadayo waa in sanad walba uu dejiyo Baarlamaanka Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya. Bilowga marka uu dhaqangelayo Xeerkan, heerka/nisbada waxaa ay noqoneysaa sida lagu sheegey Jadwalka 3aad.
5. Wasiirka Maaliyadda ayaa, muddo ka dibba, soo saari kara **Xeer-nidaamiyeyaal** oo xaaladda waafajinaya ama wax-ka-beddelaya Jadwallada Xeerkan, oo uu ku jiro laakiin uusan ku koobneyn Jadwalka 3aad.

Qaybta 5aad. Canshuur-bixiyaha

6. Canshuurta Mushaaraadka waa in la daraaseeyaa/qiimeeyaa uuna bixiyaa milkiilaha ganacsiga ama cidda loo aaminsan yahay milkiilaha ganacsiga haddii milkiilaha aan la cayimi karin.
7. Haddii ganacsi ay leeyihiin dad hal qof ka badan, milkiilayaasha waa in ay u magacaabaan ayna u fasaxaan mid ka mid ah milkiilayaasha in uu dhammaan milkiilayaasha wakiil uga noqdo isaga oo ah milkiilaha loo aaminsan yahay milkiiyadda ee ahdaafta la xiriira fulinta arrimaha uu waajibineyo Xeerkan.
8. Marka laga soo tago waxa ay sheegeyso farqadda 8aad ee qaybtan, haddii ganacsi ama hanti ma-guurto ah ay leeyihiin dad hal qof ka badan, dhammaan milkiilayaasha waxaa si wadajir ah iyo si shakhsi ahba loogu leeyahay canshuurta iyo lacagaha kale ee uu waajibinayo Xeerkan.
9. Marka aanu jirin milkiile ku diiwaangashan hanti-maguurto ah, ganacsi ama marka milkiilaha aan la aqoonsan karin, canshuur-bixiyaha waa in loo qaataa in uu yahay ka-faa'iideystaha hantida ma-guurtada ah, oo ay ka mid yihiin:

1. Shakhsiga ama shakhsiyaadka faa'iido maaliyadeed ka helaya waxa ka soo baxa ganacsiga ama hantida.
2. Qofka ku jira dhismaha ganacsiga.
3. Qofka loo aaminsan yahay in uu yahay milkiilaha dhulka ganacsigu ku yaallo ama ku shaqeynayo.

Qaybta 6aad Go'aaminta Qiyaasta Qiimaha Mushaarka ama Dakhliga ganacsi

10. Wasaaraddu waa in ay fulisaa sahan muddo ka dibna la sameeyo oo hadafkiisu yahay in ganacsiyada ay ku kala saarto nooca hawshooda, iyo cabbirkooda.
 1. Kala-saaridda ganacsiyada loo kala saarayo waxa ay ku hawlan yihiin waxaa loo adeegsanayaa keliya noocyada lagu sheegey jadwalka 1aad.
 2. Ganacsiyada waa in loo kala saaraa si waafaqsan cabbirkooda (baaxaddooda) ilaa shan darajo oo la kala siinayo xuruufaha: A, B, C, D, ama E. Marka ay sameyneyso kala-soocidda wasaaraddu waxaa ay ku xisaabtami kartaa waxyaabahan soo socda: Bedka dhismaha, tirada shaqaalaha, iibka maalintii, nooca hawlaha ay ku jirto, halka goobtu ay ku taallo.
 3. Ganacsiga lagu baadi-sooco in uu yahay heerka A waxaa looga baahan yahay in qoraal sax ah uu ka hayo lacagaha la siiyey shaqaalaha (mushaarka), iyo iibkooda (dakhligooda), waana in uu hayaa qoraalladaan muddo 5 sano ah si ay kormeer ama hantidhowr ugu sameeyaan saraakiisha Wasaaradda. Ciddii u hoggaansami weyda qodobkan waxaa lagu ciqaabi doonaa ganaax aan ka badneyn xaddiga loogu cayimey Jadwalka 5aad, waxaana lagala noqon karaa rukhsadda/shatiga ganacsiga.
 4. Noocyada ganacsiyada lagu cayimey Jadwalka 9aad waxaa si toos ah loogu baadi-soocay in ay yihiin heerka A waxaana looga baahan yahay in ay u hoggaansamaan shuruudaha looga baahan yahay ganacsiga noocaas lagu baadi-soocay, iyo sidoo kale shuruudaha kale ee uu sharcigu u dhigey. Canshuur-bixiyeyaasha u hoggaansami waaya shuruudaha 11c ee kore waxaa lagu ciqaabi karaa in lagala noqdo rukhsadaha ay ku shaqeeyaan ilaa laga gaaro waqtiga ay u hoggaansamiddooda ay xaqiijiso Wasaaradda, iyo marka laga qaado ganaax aan ka badneyn xaddigu loogu cayimey Jadwalka 5aad.

Qaybta 6A. Canshuurta Dakhliga Shakhsiga

11A. Canshuur ayaa halkaan lagu saarey mushaaraadka guud ee shaqaalaha rayidka ah ee dowladda.

- a. Canshuurta laga rabo canshuur-bixiyaha waa in lagu xisaabiyaa nisbada lagu tilmaamey Jadwalka 3aad.
- b. Canshuurta Dakhliga Shakhsiga ah waa in loo xisaabiyaa si waafaqsan mushaarka guud ee qofka shaqaalaha ah, oo laga reebey gunnooyinka.

- c. Ka-goynta: Xaddiga canshuurta laga rabo waa in laga gooyaa mushaarka qofka shaqaalaha ah uu ka qaadanayo cidda uu u shaqeeyo, waana in lagu muujiyaa waraaqda mushaar-bixinta.
- d. Dhammaan canshuuraha laga gooyey shaqaalaha waa in loo gudbiyaa Hay'adda Dakhli-Ururinta ee Wasaaradda, waana in loogu gudbiyaa sida ay tilmaameen **Amarrada/Tilmaamaha** Wasiirka.

Qaybta 6B. Racfaanada

- 11. Canshuur-bixiyayaasha waxaa ay racfaan ka qaadan karaan wax kasta oo la xiriira canshuur ku waajibtey, oo uu ka mid yahay baadi-soocooda ama daraaseynta/qiimeynta lagu qiyaasey in uu yahay mushaarkooda ama dakhligooda, ama nooca lagu sheegey ganacsigooda, ama diiwaangelinta halka uu deggan yahay ganacsigooda. Qaabka Racfaanka waa in lagu tilmaamaa **Xeer-nidaamiyeyaal** uu soo saaro Wasiirka.

Qaybta 7aad. Canshuur-dhaafka iyo Cabbirka ugu hooseeya

12. Ganacsiyada/hay'adaha waa laga dhaafayaa canshuurta haddii uu Wasiirku xaqiijiyo in ay ka soo baxeen shuruudahan soo socda:

- a. Ganacsi noociisa lagu qiimeeyey cabbirka "E" si waafaqsan Xeerkan
- b. Ururro/hay'ado uu Wasiirku xaqiijiyey in ay yihiin "Ururro Dadka u Daneeya". Wasiirku waa in uu xaqiijiyaa in ururrada ay ka soo baxayaan shuruudaha soo socda:
 - i. Ururrada/hay'adaha la xaqiijiyey in ay Dowladda Federaalka Soomaaliya ugu sameysey si waafaqsan shuruudaha u habboon.
 - ii. Ururro/hay'ado u qaabeeyan in ay maareeyaan afooyinka oo lagu baadi-soocay in ay leeyihiin tilmaamo dabiici ama bani'aadamnimo.
 - iii. Ururrada loo qaabeeyey in ay adeegyo caafimaadka guud ama adeegyo daaweyn oo qayb ka ah hawlaha dowladda ee Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya.
 - iv. Hawlgallada Diblomaasiga ah oo ay abuuraan dowladaha dalalka ajnebi ah ama urur-goboleedyada caalamiga ah oo ay ka mid yihiin lakiin aan ku koobneyn Qaramada Midoobey, Midowga Yurub iyo Midowga Afrika.
- c. Wasiirku waa in uusan "Urur Dadka u Daneeya" u aqoonsan urur kasta oo loo aqoonsado in uu (a) qabto hawlo ganacsi oo aan ahayn kuwii loogu talogaley.
- d. Magacyada iyo faahfaahinta ururrada soo codsada oo loona sameeyo canshuur-dhaaf si waafaqsan Xeerkan waa in lagu qoraa laguna taxaa Jadwalka 12aad ee Xeerkan.

Qaybta 8aad. Waajibnimada Is-diiwaangelinta iyo soo xareynta Xisaabaadka

12. Qof kasta oo maamulaya ganacsi ama NGO oo ka shaqeeya degaanka Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya waa in uu soo codsadaa in la diiwaangeliyo isaga oo adeegsanaya foomka loogu talogaley ee ay dhigayaan **Tilmaamaha** ay soo saartey Wasaaradda.
 - a. Wasaaraddu waxaa ay canshuur-bixiye kasta siin doontaa Lambar Lagu Aqoonsanayo Canshuur-bixiyaha, waxaana ay baadi-sooci doontaa ganacsiga si waafaqsan qaybta 10aad ee Xeerkan.
 - b. Caddeynta diiwaangelinta waa in lagu dhejiyaa meel muuqata oo ka mid ah dhismaha uu ka diiwaangashan yahay ganacsiga.
 - c. Lambarka Aqoonsiga Canshuur-bixiyaha waa in lagu tixraacaa dhammaan canshuur-celinta iyo xiriirrada lala soo yeelanayo Wasaaradda.
 - d. Canshuur-bixiye kasta oo ay waajib ku tahay canshuurta mushaarka ama dakhliga waa in uu xisaabaadka canshuurta u soo gudbiyaa si waafaqsan **Xeer-nidaamiyayaasha**.
13. Canshuur-bixiyayaasha waxaa laga rabaa in ay haystaan nuqulka daraaseyta/qiimeynta dhowaan lagu sameeyey iyo risiidhka canshuuraha ay dhowaan bixiyeen si ay u tusaan marka kormeerayaasha canshuurta ay kormeer ku yimaadaan goobahooda shaqada.

Qaybta 9aad. Bixinta Canshuurta

14. Dhammaan canshuuraha waa in lagu wareejiyaa sarkaal canshuur oo loo igmadey iyada oo lagu bixinayo xafiiska loogu talogaley ka hor maalinta kama dambeysta ah ee lagu sheegey Xeer-nidaamiyayaasha.
15. Haddii tirada canshuurta la iska rabo ama qayb ka mid ah aan la bixinin maalinta kama-dambeysta ah ama ka hor maalinta kama-dambeysta ah ee ay tahay in la bixiyo, ganaaxa lagu cayimey Jadwalka 5aad ayaa lagu soo dallacayaa.
16. Lacagtan waxaa loo bixin karaa bil-bil ama saddex-biloodle muddo hal sano ah ka hor maalinta ay waajibseyso.
17. Shaac-ka-qaadista iyo risiidhada ayaa si nidaamsan ay u eegi kartaa Wasaaradda, waxaana haddii khaladaad lagu arko, ay saraakiisha ay u xilsaartey wasaaraddu ku sameyn karaan dib-u-daraaseyn, waxaana lagu soo rogi karaa ganaaxa lagu cayimey Lifaafa 5aad. Haddii la ogaado in ay khayaano jirtey, waa in lagu qaadaa dacwad fal-dembiyeed.
- 18A. Xusuusta laga reebo dhammaan canshuuraha la ururiyo waa in lagu qoraa foomka waana in loo sameeyo si waafaqsan habraacyada loogu talogaley ee uu dhigayo **Xeer-nidaamiyaha** uu soo saarey Wasiirka.

18. Ganacsiyada heerkoodu yahay A ee aan soo gudbin bayaan ay isku qiimeynayaan, ama aan bixinnin qoraallada xogta ganacsiga waxaa daraaseyn ku sameyn kara saraakiil ka socda Wasaaradda iyaga oo adeegsanaya qoraalladii lacag-bixintii hore ama tirada lacagta loogu cayimey Jadwalka 2aad hadba tan ugu sareysa.
19. Wasiirka ayaa isaga oo adeegsanaya ogolaanshaha baarlamaanka waxaa uu degaan gaar ah oo ka mid ah dhulka Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya ka dhigi karaa kuwo “xiran” muddo cayiman, sababo la xiriira cimilada, amniga ama xaalado degdeg ah oo loogu dhawaaqey si waafaqsan shuruucda u habboon daraaddood. Dhammaan Canshuuraha Dakhliga/Iibka iyo Canshuuraha Mushaaraadka lama bixinayo muddadan loo cayimey.

Qaybta 10aad. Canshuurta dakhliga ganacsiyada

20. Canshuur dakhli/iib waa in Sanad-Canshuureed kasta uu ganacsi kasta sida lagu qeexay qaybta 2aad waqti un ka mid ah Sanad-Canshuureedka uga bixiyaa hawlaha ganacsi uu ka wado degaanka Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya (iyada oo aan loo eegeynin in ganacsigu uu faa’iido sameeyey sanad-canshuureedka laga hadlayo iyo in kale).
21. Canshuur-bixiyuhu waxaa uu lacagta u bixin karaa saddex-biloodle ama bil-bil ka hor maalinta kama-dambeysta ah.
22. NGO-yada aan canshuur-dhaafka loogu sameyn si waafaqsan Xeerkan waxaa waajib ku ah in ay canshuurta dakhliga ka bixiyaan qiimaha miisaaniyad-sanadeedda mashaariicdooda ka dib marka laga jaro qiimaha sanadka kaga baxa mushaaraadkooda ee loogu dhawaaqey si loo xisaabiyo lacagta canshuurta ah ee mushaaraadka.

Qaybta 11aad. Aqoonsiga Canshuur-bixiyaha, Qodobbo guud.

23. Dhammaan qodobbada sharci ee la xiriira Canshuurta Mushaaraadka waa in lagu saleeyaa Canshuurta Dakhliga, marka laga reebo qodobbada barafagaafka 25aad ee soo socda.
24. Dhammaan Ganacsiyada waxaa ay lacagaha u bixin karaan bille ama saddex-biloodle si waafaqsan xaddiga lacaga loogu cayimey canshuurta dakhliga (iibka) ee ku yaalla Jadwalka 2aad.
 - a. Ganacsiyada loo aqoonsado in ay yihiin darajada A waxaa ay is-daraaseynta dakhligooda (iibkooda) ay sal uga dhigayaan diiwaannada/qoraallada waxa ay iibiyeen iyo risiidhada, kuwaas oo ay tahay in laga markhaati kaco oo kormeerna lagu sameeyo haddii ay codsato Wasaaradda. Is-daraaseyntooda waa in loogu dhawaaqaa si waafaqsan qaybta 8aad ee Xeerkan. Canshuur-celinta khayaanno ama daacadnimo la’aan loo sameeyo ayaa lagu muteysan karaa dacwad fal-dembiyeed.

- b. Ganacsiyada lagu baadi-sooco darajada A waa in ay canshuurta lagu leeyahay u xisaabiyaan iyaga oo dakhliga ay isku-daraaseeyeen in uu soo galey ku dhufanaya nisbada lagu cayimey Jadwalka 3aad.
- c. Dhammaan Jadwallada waa in ay sanad walba xisaabisaa ayna baahisaa Wasaaradda iyada oo ku soo saareysa Xeer-nidaamiye.

Qaybta 12aad. Heerka (nisbada) Canshuurta

- 25. Heerka/nisbada canshuurtu ee loo adeegsado in lagu xisaabiyo xaddiga lacagta la iska rabo waa in uu ahaadaa sida loogu cayimey Jadwalka 3aad.

Qaybta 13aad. Lacag-bixin iyo risiidh.

- 26. Lacagaha waa in loo bixiyaa si waafaqsan qodobbada qaybta 9aad ee Xeerkan.
- 27. Canshuur-bixiyaha waa in uu nuqul la akhrrin karo oo risiidhkii ugu dambeeyey ah uu ku dhejiyaa iridda goob kasta oo ganacsi.

Qaybta 14aad. Shati/laysan Ganacsi

- 28. Milkiilayaasha dhammaan ganacsiyada ka shaqeeya degaanka Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya waxaa ku waajib ah in ay isu diiwaangeliyaan si waafaqsan qaybta 8aad ee Xeerkan, ayna bixiyaan ujuuro shati/leysan sanadle ah oo goob kasta oo ganacsi lagu sameynayo loo sameeyo.
 - 1. Lacagta waa in la bixiyaa ka hor 1da Maarso sanad kasta.
 - 2. Waa in lacagta la bixiyey risiidh loo gooyaa, waana in si joogto ah loogu dhejiyaa meel u dhow albaabka dhisme kasta oo ganacsi lagu fuliyo.
 - 3. Qaddarka/tirada lacagta la bixinayo waa in ay waafaqsanaataa Jadwalka 4aad.
 - 4. Ururinta shatiyada ee gudaha degaan uu ka dhisan yahay maamul degmo oo shaqeynaya waa in ay sameeyaan saraakiil ka socda maamulkaas iyaga oo u sameynaya si waafaqsan nidaamyada iyo habraacyada uu Wasiirku ku qeexay Xeer-nidaamiyeyaal.
 - 5. Maamulka degmada waxaa looga baahan yahay in uu magacaabo saraakiil sare oo loo diiwaangelin karo Wakiillo Canshuur-ururin oo Rukhsad loo siiyey si waafaqsan qaybta 24aad ee Xeerkan.

Qaybta 15aad. Canshuurta Hantida Magaalooyinka

- 29. Canshuur hanti oo laga bixinayo boos-dhuleed kasta oo la sahamiyey oo ku yaalla degaanka hoos taga maamul degmo oo magaalo ka tirsan Dowlad-goboleedka

Hirshabeelle ee Soomaaliya. Dakhliga lagu helo canshuurta hantida waa in maamulka degmada loogu qoondeeyaa si waafaqsan miisaaniyad-sanadeedda la ansaxiyey ee Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya.

- I. Lacagta waxaa bixinaya qofka ku diiwaangashan lahaanshaha hantida
 - II. Haddii qofka milkiilaha ahi uu maqan yahay, qofka ay u kireysan tahay ama qofka deggan hantida ayaa bixinaya lacagtaas
 - III. Nisbada canshuurta waa ay kala duwanaan kartaa si waafaqsan waxa loo oggol yahay in loo isticmaalo iyo darajada ganacsiga halkaa ka shaqeeya. Heerka/nisbada canshuurta waxaa lagu sheegey Jadwalka 3aad ee Xeerka.
 - IV. Canshuurta waxaa loo bixinayaa sanadle waana in la bixiyaa ka hor 31ka Maarso sanad walba.
 - V. Boosaska ku yaalla meelo ka baxsan dhulka degmada loo aqoonsan yahay, ayaa marka uu maamulka degmadu ka codsado uu Wasiirka u oggolaan karaa in canshuur laga qaado. Wasiirka waa in uu oggolaadaa codsiyada noocaas ah haddii:
 1. Boosaska ay ku yaallaan dhismayaal degaan ama ganacsi ama warshadeed, iyo
 2. Wasaaradda ay khuseyso loo gudbiyey codsi ku aaddan in xuduudda degmada laga shishe mariyo halka uu boosku ku yaallo.
 3. Booska uu ka faa'iidayo kaabayaal ama adeegyo uu bixintoodu mas'uul ka yahay maamulka degmada.
 4. Boosku uu ku dhex yeello 1 km gudaheeda halka ay hadda tahay xuduudda degmada ee hadda jirta.
 - VI. Meelahan soo socda ayaa laga dhaafey canshuuraha hantida:
 - a. Goobaha cibaadada
 - b. Xafiisyada dowladda
 - c. Ururrada/hay'adaha canshuur-dhaaf loogu sameeyey si waafaqsan qaybta 7aad ee Xeerkan.
30. Wasiirka ayaa **Xeer-nidaamiye** ku cayimi kara arrin kasta oo la xiriirta maamulka, daraaseynta iyo qaadista canshuurta hantida. **Xeer-nidaamiyeyaasha** noocaas ah waa in ay ku jiraan:
- a. Nooca iyo maareynta diiwaanka hanti
 - b. Nooca iyo waqtiyada la sameynayo sahamada lagu sameynayo oo waxna looga beddelayo diiwaanka hantida.
 - c. Waajibnimada in la baahiyo diiwaanka iyo xuquuqda ay dadka deggan ku diidi karaan arrintaas si waafaqsan qaybta 6B.

Qaybta 16aad. Canshuurta Shidaalka

31. Waa in ay canshuur bixiyaan dhammaan kuwa shidaalka badan jumlada ku soo iibsada.
1. Shidaalka waxaa la dhihi karaa waa mid “badan oo jumlo lagu soo iibsado” marka uu ku jiro weelal 200 Litir-qaad ama ka weyn ah.
 2. Heerka/nisbada canshuurta laga qaadayo waxaa lagu cayimey Jadwalka 3aad.
 3. Kuwa shidaalka jumlada ku soo iibsada waa in ay Wasaaradda ka codsadaan in ay u diiwaangeliso in ay yihiin kuwo shidaalka qeybiya, muddo 1 bil oo ka bilaabata taariikhda Xeerkan gudaheeda.
 4. Wasaaraddu waxaa ay kuwa shidaalka qeybiyaa u diiwaangelin kartaa si waafaqsan shuruudaha uu u dejiyey Wasiirka isaga oo la tashanaya maamullada u habboon, oo uu faafiyeyna iyaga oo ah **Xeer-nidaamiyeyaal** la xiriira Xeerkan. Waxaa laga qaadi karaa ujuurada diiwaangelineed, ee lagu sheegey Jadwalka 3aad.
 5. Wasiirku waa in uu siiyaa shahaaddo diiwaangelineed soo-codsadayashaa ku guuleysta in la diiwaangeliyo, shahaadadaas waa in laga helaa goobta ganacsiga marka kormeer loogu yimaado. Nuqul la akhrin karo waa in lagu soo bandhigaa meel u dhow iridda dhisme kasta oo ganacsi shidaal-qaybin ah lagu hayo.
 6. Kuwa shidaalka ku soo iibsada jumlada waa in ay diiwaan/qoraal sax ah keydiyaan si uu u eegi karo sarkaal loo igmadey oo ku shaqo leh dakhliga.
32. Waa dembi in shidaal badan jumlo lagu soo iibsado si uu qofku shakhsi ahaan ugu isticmaalo ama uu uga ganacsado sidii shidaal-qeybiye ama uu ka shaqeysiiyo dab-dhaliye ka weyn tan loogu qoondeeyey Jadwalka 3aad isaga oo aan u haysan diiwaangelin/rukhsad sax ah oo waqtigeedu aanu dhicin. Ganaaxa dembigaas la xiriira waxaa lagu cayimey Jadwalka 5aad.

Qaybta 16Aaad. Canshuurta Dhalinta Korontada

33. Waa in ay canshuur ka bixiyaan kuwa ku shaqeeya dab-dhaliyeyaasha wadarta awooddoodu ka weyn tahay tan loogu cayimey Jadwalka 3aad, oo lagu sheegey qaab *Kilo-Volt-Amps (KVA)* ah.
1. Heerka/nisbada canshuurta waxaa lagu cayimey Jadwalka 3aad.
 2. Kuwa leh dab-dhaliyeyaasha ka weyn awoodda loo cayimey waxaa laga doonayaa in ay iska diiwaangeliyaan Wasaaradda.
 3. Canshuurta waxaa la bixinayaa sanad kasta, si la mid sida loo bixiyo Canshuurta Mushaarka ee xagga sare lagu sheegey.

4. Canshuurta laga rabo waxaa lagu xisaabinayaa iyada oo nisbada ku qoran Jadwalka 3aad lagu dhufanayo tirada inta KVA ee la rakibey.

Qaybta 17aad. Ujuurooyinka Suuqa

34. Maamullada Degmooyinka waxaa ay degaanno gaar ah oo ku yaalla degaanka degmada u cayimi karaan suuqyo. Dhammaan kuwa goobo ganacsi ku leh suuqyada la cayimey waa in ay bixiyaan ujuuro ku aaddan amniga iyo nadaafadda suuqa.
 1. Lacagta laga helo ujuuradaas waa in loo qoondeeyaa dowladda degmadaas ay lacagtu ka timid.
 2. Qaddarka/xaddiga ujuurada waxaa lagu cayimey Jadwalka 3aad.
 3. Maamulidda ujuurada suuqa waa in ay waafaqsanaataa qaybta 24aad ee Xeerkan.

Qaybta 18aad. Shati/laysan iyo Diiwaangelin Baabuur

35. Ujuuro laysan/rukhsad iyo diiwaangelin baabuur oo la mid ah qaddarrada/tirooyinka lagu sheegey Jadwalka 3aad ee Xeerkan waa in Dowlad-goboleedku ku soo rogaa sanad kasta marka baabuurka sanad kasta lagu diiwaangeliyo Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya.
 1. Canshuur-bixiye waa shakhsi kasta oo deggan Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya oo leh baabuur ay tahay in lagu diiwaangeliyo Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya dhexdiisa.
 2. Canshuur-bixiye waxaa soo hoos-geliya qof kasta oo leh baabuur oo deggan Dowlad-goboleedka ama iibsada baabuur ay tahay in laga diiwaangeliyo Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya.
 3. Ujuurada shatiga/rukhsadda iyo diiwaangelinta baabuurta waa in la bixiyaa marka gaariga la soo iibsado, iyo ka hor 31ka Maarso ee sanad kasta oo ku xiga.
 4. Ciddii bixin weyda ujuurada diiwaangelinta baabuurta waxaa la ganaaxayaa ganaaxa lagu cayimey Jadwalka 5aad.
 5. Shakhsiyaadka bixinaya ujuurada shatiga/rukhsadda iyo diiwaangelinta baabuurta waxaa la siinayaa shahaado diiwaangelin oo ay waajib tahay in ay ku dhejiyaan meel muuqata oo baabuurka ka mid ah.
36. Haddii aan la caddeynin in la bixiyey ujuurada shatiga iyo diiwaangelinta, lama diiwaangelin karo, dib-looma diiwaangelin karo lamana kormeeri karo.
37. Ujuurooyinka shatiga/rukhsadda iyo diiwaangelinta baabuurta waxaa qaadi kara saraakiil Wasaaradda Gaadiidka ka tirsan oo ah Wakiillo Dakhli-ururin oo rukhsad ay siisey Wasaaradda, waana in hawshaas loo qabtaa si waafaqsan **Xeer-nidaamiyeyaasha** uu soo saaro Wasiirka.

Qaybta 19aad. Shatiga/Laysinka La-soo-bixidda iyo Goosashada Kheyraadka

- 38.
39. Shakhsi kasta oo ka shaqeeysta ganacsi la-soo-bixid iyo goosasho kheyraad ee lagu taxay Jadwalka 3aad ee dhulka dadweynaha ee Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya, ama Maamul dowlad hoose, waa in uu shati/laysin ka qaataa Dowlad-goboleedka ka hor inta uusan la soo-bixin ama goosan kheyraadkaas.
1. Lacagta ujuurada shatiga waxaa ay u dhigantaa tirada kheyraadka uu shatigaa u oggol yahay in uu la soo baxo ama goosto si ku saleysan hal-beegga oo lagu dhuftey qiimaha halkii halbeeg loogu gooyey Jadwalka 3aad. Isla ujuuradaas ayaa laga qaadayaa dhammaan ganacsiyada kala duwan ee la-soo-bixidda iyo goosashada iyada oo aan loo eegeynin cabbirka, hawlaha ama dakhliga soo gala.
 2. Wasiirka ayaa wax ka beddeli kara qaddarka kheyraadka lala soo bixi karo sanadka si waafaqsan sahanka sanad kasta lagu sameeyo ganacsiga la-soo-bixidda iyo goosashada si ay taas uga tarjunto xaaladaha ka jira degaanka.
 3. Ujuurada shatiga/laysinka waa in la bixiyaa waqtiga la qaadanayo shatiga/laysinka.
 4. Si ay u caddeeyaan in la bixiyey lacagta ujuurada shatiga/laysinka, Dowlad-goboleedka, ama Maamulka Dowladda Hoose, waa in ay soo saaraan shati/laysin lambareysan.
 5. Ganacsigu waa in uu haystaa nuqul ka mid ah shatiga/laysinka si uu u tuso marka ay kormeer ugu timaaddo Wasaaradda ama wakiil ka socda Maamulka Dowladda Hoose.
40. Cidda bixin weyda lacagta ujuurada shatiga/laysinka waxaa lagala wareegayaa kheyraadkii ay la soo baxdey ama ay goosatay waxaana laga mamnuucayaa in hal sano ay la soo baxdo ama goosato kheyraadka noocaas ah.

Qaybta 20aad. Xeer-nidaamiyayaasha iyo Tilmaamaha/Amarrada

41. Wasiirku waa in uu soo saaraa Xeer-nidaamiyayaasha iyo Tilmaamaha/Amarrada loogu baahdo in si taabagal ah oo hufan loo hirgeliyo qodobbada Xeerkan.
- a. **Xeer-nidaamiyayaashu** waa in ay waafaqsanaadaan dhammaan qodobbada Xeerkan, ama Xeer kasta oo kale oo uu leeyahay Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya oo lagu maamulo arrimaha uu taabanayo **Xeer-nidaamiyaha**.
42. Wasiirku waxaa uu soo saari karaa **Amarro/Tilmaamo** sharxaya foomamka, ogeysiisyada, xisaab-celinta iyo dokumentiyada kale ee lagamamaarmaanka u ah in si

taabogal ah oo hufan loo hirgeliyo qodobbada Xeerkan. Wasiirku waa in uu dokumentiyadaas ka dhigaa kuwo ay lacag la'aan ku helaan dadweynaha.

43. Wasiirku waxaa uu soo saari karaa **Tilmaamo/Amarro** ama waxaa uu u wakiilan karaa saraakiisha loo oggol yahay ama Wakiillada Dakhli-ururinta ee La Aqoonsan yahay ee ku qeexan qaybta 24aad ee Xeerkan ee la xiriira sida si taabogal ah oo hufan loogu hirgelinayo Xeerkan.

Qaybta 21aad. Canshuur ka-qaadista NGO-yada, Sharikadaha Gaarka Loo Leeyahay iyo Hay'adaha Kale ee Maareeya Maaliyad/Sanaadiiq.

44. **Rukhsadaha/shatiyada:** Cid kasta oo maamuleysa ama dooneysa in ay qaab Urur Aan Dowli Ahayn (NGO) uga shaqeyso dhulka Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya waa in ay is-diiwaangelisaa ayna haysataa shahaaddo diiwaangelin oo ay soo saartey Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Dowladdaha Hoose. Waana in ay iska-bixisaa khidmad diiwaangelin si waafaqsan jadwalka 3aad.
45. Ururrada diiwaangashan waxaa qabanaya dhammaan shuruucda Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya oo ay ka mid yihiin dhammaan shuruudaha maaliyadeed iyo canshuur ee ku jira Xeerkan iyo Xeerarka kale.
46. Wasaaradda ka mas'uulka ah waa in ay bil kasta ay Wasaaradda u soo gudbisaa nuqullada dhammaan shahaadooyinka diiwaangelinta ee la bixiyey.
47. Waxaa dembi ah in cid ay bixiso macluumaad been ah marka ay sameyneyso is-diiwaangelin, dembigaas oo soo jiidanaya ciqaab ah ganaaxa lagu cayimey Jadwalka 5aad ama in lagala noqdo diiwaangelinta ama labadaba.
48. Wasaaradda ka mas'uulka ah waa in ay hubisaa in la ilaaliyo dhammaan shuruucda iyo Xeer-nidaamiyeyaasha u habboon hawsha ay qabaneysa cidda soo codsaneysa diiwaangelinta
49. NGO-yada iyo sharikadaha aan canshuurta looga dhaafin si waafaqsan xeerkan. Canshuurta waa in ay u bixiyaan si waafaqsan nisbada loogu cayimey Jadwalka 3aad qiimaha mushaarka buuxa ee la siiyo ama qaddarka lacagta toddobaadlaha ama billaha ah ee shaqaalaha degaanka loogu wareejiyo mushaar ahaan iyada oo uu sidaa sameynayo nidaamka elektaroonigga ah ee lacag-bixinta ee lacag-bixiyaha ama, amar la siiyo, bankiga canshuur-bixiyaha, shaqaalaha NGO-ga, sharikadaha iyo ganacsiyada ku yaalla degaanka Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya, si waafaqsan qaybta 5aad ee Xeerkan.
50. NGO-yada, maareeyeyaasha maaliyadaha deeq-bixiyeyaasha, iyo sharikaadka mashaariic gaar ah ka fuliya degaanka Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya waa in ay bixiyaan canshuurta dakhliga (iibka) ee lagu sheegey qaybta 10aad ee Xeerkan, ama ay bixiyaan qadar u dhigma canshuurta dakhliga oo ku dhisan wadarta qiimaha mashaariicda la filayo in ay fuliyaan sanad-canshuureedkaas, ka dib marka laga jaro qaddarka lacagta mushaaraadka ee loogu dhawaaqey iyada oo ah canshuurta mushaaraadka, oo lagu dhuftey nisbad canshuurta dakhliga (iibka) ee lagu cayimey Jadwalka 3aad.

51. Ciddii u hoggaansami weysa qodobbadan xeerkan waxaa lala tiigsanayaa ciqaabaha ku qoran Jadwalka 5aad.

Qaybta 22aad. Ujuurooyinka Dekadda

52. Tariifo: ujuuro lagu bixinayo adeegyada lagu bixiyo dekadaha ku yaalla dhulka Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya ayaa uu sanad walba go'aamin doonaa Wasiirka oo la tashanaya hay'adda ka mas'uulka ah hawsha dekadaha. Marka la go'aaminayo ujuurooyinka, waa in tixgelinta ay mudan tahay la siiyaa ujuurooyinka ay qaadaan dekadaha tartanka kula jira, kharashka ku baxa adeegyada, iyo culeyska ay ujuurooyinkaasi ku yeelanayaan kuwa isticmaala dekadaha. Ujuurooyinka ayaa loo kala duwi doonaa si ku saleysan tirada iyo muddada adeegyada la isticmaalay.

53. Ujuurooyinka lagu qaado dekadaha waxaa lagu baahinayaa Jadwalka 1 laad ee Xeerkan.

54. Dhammaan dakhliga lagu qaado dekadaha waxaa loo gudbiyaan loona diwaangeliyaa si waafaqsan **Tilmaamaha/amarrada** uu soo saaro Wasiirka.

Qaybta 23aad. Ujuurooyinka Garoonka Diyaaradaha

55. Tariifada ujuurooyinka lagu bixinayo adeegyada lagu helo garoon kasta oo diyaaradeed oo la ansaxiyey oo ku yaalla dhulka Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya waxaa sanad walba go'aamin doona Wasiirka oo la tashanaya Hay'adda Maamusha Garoomada Diyaaradaha. Marka la go'aaminayo ujuurooyinka, waa in tixgelinta ay mudan tahay la siiyaa ujuurooyinka ay qaadaan garoomada diyaaradaha ee tartanka kula jira, kharashka ku baxa adeegyada, iyo culeyska ay ujuurooyinkaasi ku yeelanayaan kuwa isticmaala garoonka diyaaraha. Ujuurooyinka ayaa loo kala duwi doonaa si ku saleysan tirada iyo muddada adeegyada la isticmaalay.

56. Ujuurooyinka lagu qaado garoomada diyaaradaha waxaa lagu baahinayaa Jadwalka 10aad ee Xeerkan.

57. Hay'adda Maamusha Garoonka Diyaaradaha, ayaa, garoon kasta oo diyaaradeed, u cayimi doonta qof ka mas'uul noqda oo loo diiwaangeliyo in uu yahay Wakiil Dakhli-ururin oo La Aqoonsan Yahay si waafaqsan qaybta 24aad ee Xeerkan kaas oo raaci doona **Xeer-nidaamiyeyaasha** iyo **Tilmaamaha** loo soo saaro si waafaqsan qaybta 24aad ee Xeerkan.

Qaybta 24aad: Wakiillada Dakhli-ururinta.

58. Dhammaan dakhliyada kala duwan oo ay ka mid yihiin laakiin aan ku koobneyn canshuuraha, ujuurooyinka, lacagaha la qaado, ganaaxyada, ay qaadaan ama loo qaado wasaaradaha kala duwan ama hay'adaha kale ee dowladda waa in loo qaadaa loona maareyaa si waafaqsan siyaasadaha, nidaamyada iyo habraacyada loogu dejiyo **Tilmaamaha** uu soo saaro Wasiirku.

59. Dhammaan dakhliyada la qaado iyada oo laga wakiil yahay dowladda waa in loo maareeyaa loona diiwaangeliyaa si waafaqsan nidaamyada iyo habraacyada loogu dejiyey **Xeer-nidaamiyeyaasha** uu soo saarey Wasiirka.

Qaybta 25aad: Wakiillada Dakhli-Ururinta ee La Aqoonsan Yahay

60. Dhammaan kuwa qaada dakhli iyaga oo ka wakiil ah dowladda Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya waxaa looga baahan yahay in ay soo magacaabaan Sarkaal ama saraakiil mid ka badan oo uu Wasiisku u diiwaangeliso in ay noqdaan Wakiil Dakhli-Ururin oo La Aqoonsan Yahay oo oggolaansho u haysta in uu dakhli la cayimey uu ka qaado degaan gaar ah. Wasiirka ayaa, marka uu la-tashi la sameeyo Agaasimaha Dakhli-Ururinta, waxaa uu wakiil u magacaabi karaa si waafaqsan faqradda 61aad.
61. Wakiilka waa in uu ka soo baxaa shuruudaha guud ee Wakiillada Dakhli-Ururinta ee La Aqoonsan Yahay ee uu Wasiirku ku dejiyey **Xeer-nidaamiyeyaasha**.
62. Wakiilka Dakhli-ururinta ee La Aqoonsan Yahay waxaa uu Wasiirka uga mas'uul yahay:
 1. Hubinta in si sugan loo soo gudbiyo dhammaan lacagaha la ururiyo iyada oo looga wakiil yahay dowladda lana adeegsanayo foomamka iyo habraacyada ay dhigayaan **Tilmaamaha** uu soo saaro Maamulka Dakhli-Ururinta ee Wasaaradda.
 2. Warbixin joogto ah oo dakhli-ururinta laga soo siiyo Wasiirka si waafaqsan habka iyo qaabka ay u dhigeen **Tilmaamaha** ay soo saartey Hay'adda Dakhli-Ururinta.
 3. Hubinta in dhammaan shaqaalaha uu waajibaadkoodu ka mid yahay dakhli-ururin ay helaan tababarka u habboon ee ku saabsan waajibaadyadaas, ayna raacaan xeer-anshaxeedka Wasaaradda iyo Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.
 4. Hubinta in dhammaan arrimaha anshax-marinta ee la xiriira dakhliga loo sameeyo si waafaqsan xeer-anshaxeedka Wasaaradda.
63. Waa dembi in dadweynaha laga qaado ama la isku dayo in laga qaado lacag iyada oo laga wakiil yahay, ama la sheeganayo in wakiil looga yahay dowlad ka jirta degaanka Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya iyada oo aan si sax ah qofkaas loogu diiwaangelin in uu yahay Wakiil Dakhli-Ururin oo La Aqoonsan Yahay ama ahayn qof waqtigaasi shaqadiisu tahay Dakhli-Ururiye u shaqeeya Wasaaradda Maaliyadda ee Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya. Ciqaabaha ka dhalanaya waxaa ay ku qoran yihiin Jadwalka 5aad.
64. Hay'adahan soo socda waxaa looga baahan yahay in ay sarkaal sare u diiwaangeliyaan in uu noqdo Wakiil Dakhli-ururin oo La Aqoonsan Yahay:
 1. Hay'adaha maamula dekada iyo garoonka diyaaradaha.
 2. Waax ama wasaarad dowladeed oo dakhli ururisa sida rukhsado/shatiyo ama ujuurooyin.
 3. Maamul degmo, dowlad hoose, ama hay'ado kale oo dowladeed.
 4. Sharikadaha gaarka loo leeyahay ee qandaraas lagu siiyo in ay qabtaan adeeg ay wakiil uga yihiin dowladda oo la xiriira ururinta canshuuraha, ujuurooyinka/khidmooyinka, dibaajiga, ama dakhli nooc kale ah.

5. Hay'adaha Wax-soo-dejinta & Wax-dhoofinta oo aqbala tacriifooyinka iyo ujuurooyinka u sugnaadey dowladda.
 6. Hay'adaha shaqadoodu la xiriirto shixnadaha ee oggolaada ujuurooyinka dekada iyo garoonka diyaaradaha ee u sugnaadey dowladda.
65. Wasiirku waxaa uu, isaga oo adeegsanaya "waraaq Awood Cid u Wakiilasho", uu awooddiisa la xiriirto dhammaan arrimaha kala duwan ee la xiriira wakiillada u dhiiban karaa Agaasimaha Hay'adda Dakhli-Ururinta.

Qaybta 26aad: Shaac-ka-qaadista Hantida (*Declaration of Wealth*)

66. Dhammaan saraakiisha dakhliga waxaa looga baahan yahay in ay shaac ka qaadaan hantida, dakhliga iyo danaha iska hor imaanaya ee ay ku waajibinayaan shuruucda u habboon.

Qaybta 27aad: Xiriirka Lala Leeyahay Dowladda Federaalka ee Soomaaliya

67. Dastuurka Dowladda Federaalka ee Soomaaliya (DFS) ayaa tilmaamaya go'aaminta xuquuqaha iyo waajibaayada, iyo qaybinta hawlaha iyo dakhliga.
68. Dowladda Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya ayaa ka mas'uul ah habraacyada iyo nidaamyada maaliyadeed ee la xiriira dakhliga iyo kharashaadka iyada u gaarka ah.
69. Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya waa in ay hubisaa in siyaasadaheeda, nidaamyadeeda iyo habraacyadeedu ay waafaqsan yihiin kuwa Dowladda Federaalka ah ee Soomaaliya.

Qaybta 28aad: Canshuurta Waddo-marista (*Road User Tax*)

70. Canshuur Waddo-marista ayaa laga qaadayaa baabuurta ganacsiga iyo kuwa sida badeecooyinka ee soo gelaya ama ka baxaya dhulka Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya. Canshuuraha waddo-marista waxaa bixinaya hawl-wadeennada baabuurta ganacsiga iyo kuwa sida badeecooyinka.
71. Xaddiga lacagta la qaadayo waxaa lagu saleyn doonaa Wadarta Culeyska Baabuurka u diiwaangashan, ee ku qoran dokumentiyada rukhsad-siinta baabuurta. Nisbooyinka waxaa sanad walba ay Wasaaradda ku baahin doontaa **Xeer-nidaamiyeyaal**.
72. Wasiirka ayaa muddo ka dibba, waxaa uu **Xeer-nidaamiye**, canshuur-dhaaf ugu sameyn karaa baabuur ganacsi ama kuwo sida badeecooyin oo gaar ah marka ay sidaan badeecooyin loo adeegsanayo ujeedooyin gaar ah. Ujeedooyinka gaarka ah waxaa ka mid ahaan kara qaadista badeecooyin loogu talo galey gargaar bani'aadamnimo ama mashaariicda ay maalgeliyaan deeq-bixiyeyaasha oo canshuur-dhaafkoodu horey loo ansaxiyey.
73. Canshuurta Waddo-marista ee ay bixiyaan hawl-wadeennada baabuurta wadda badeecooyinka lagu sheegey faqradda 73 waa in lagu bixiyaa baraha kantaroollada ee loogu talogaley laakiin waxaa lagala soo noqon karaa xarumaha Hay'adda Dakhli-Ururinta ee Wasaaradda ka dib marka loo soo gudbiyo dokumentiyo laga heley cidda isticmaaleysa badeecooyinka, kuwaas oo caddeynaya in badeecooyinkii ay gaareen halkii loo wadey loona isticmaaley hawshii bani'aadamnimada ama mashruucii canshuur-dhaafka haystey.

74. Canshuuraha Waddo-marista waxaa qaadi kara keliya dakhli-ururiyeyaasha loo aqoonsan yahay ee jooga baraha kantaroolka ee ay ansaxisey Wasaaradda ka mas'uulka ah amniga xuduudda. Calamadda baraha kantaroolka ee la ansaxiyey waa in ay si cad u muujiyaan awoodda lagu abuurey waana in loo dhisaa si waafaqsan **Xeer-nidaamiyeyaasha** u habboon.
75. Iskudayidda in dakhli lagu ururiyo bar kantarool oo aan lagu abuurin oo hawsheedana loo wadin si waafaqsan oggolaanshaha saxda ah waa fal-dembiyeed soo jiidanaya in lala wareego hantida iyo qalabka lagu wado hawlgelinta barta kantaroolka, xukun xabsi aan ka yareyn 2 sano iyo ganaax aan ka yareyn \$5000.

Qaybta 29aad: Sirnimada Macluumaadka Canshuur-bixiyaha

76. Dhammaan macluumaadka uu canshuur-bixiyuhu siiyo hay'adaha canshuurta, haddii uu yahay canshuur-celin ama qaab kale, waa in dhammaan saraakiisha ay ilaaliyaan sirnimadiisa.
77. Wasiirku waa in uu hubiyaa in **Xeer-nidaamiyeyaal** la xiriira in macluumaadka si ammaan ah loo keydiyo iyo in habraacyada la xiriira helidda macluumaadka ay si taabagal ah u shaqeynayaan.
78. Dhammaan saraakiisha waa in lagu tababaraa ilaalinta sirta.
79. U-hoggaansamid la'aanta **Xeer-nidaamiyeyaasha** la xiriira sirnimada waa dembi anshax-xumo culus ah waxaana ay horseedi kartaa in qofka lagu qaado dacwad fal-dembiyeed.

Qaybta 30aad. Hirgelinta Heshiiska Gaarka ah ee mideynta kastamka iyo qiimaha canshuurta Jaadka iyo Sigaarka.

81. Qeexid
82. "**Heshiis**" waxaa loola jeedaa is-afgarad ama dokumenti kale oo Wasiirrada Maaliyadda ee Dowlad-goboleedka iyo Dowladda Federaalka kaga heshiiyeen in si mideysan loo hirgeliyo canshuur ama kastam gaar ah.
83. Qodobbada qaybtan waxaa ay la xiriiraan heshiisyadan lagu cayimey jadwalka 13aad.
84. Wasiirka Maaliyadda waa in uu faafiyaa **Xeer-nidaamiyeyaal** iyo **Tilmaamo** dhaqangelinaya shuruudaha heshiiska lagu cayimey jadwalka 13aad
85. Soo-dhoofinta Jaadka iyo sigaarka waxaa loo sameyn karaa keliya si waafaqsan **Xeer-nidaamiyeyaasha** iyo **Tilmaamaha** lagu xusey baragaraafka 83 ee kore.
86. Haddii ay dhacdo in ay iska horyimaadaan **Xeer-nidaamiyeyaashaa** iyo **Tilmaamahaa**, iyo sharci dowlad-goboleed ama federaal, sharciga dowlad-goboleedka ama federaalka ayaa la raacayaa.
87. Heshiisyada, ama wax-ka-beddellada dambe ee lagu sameeyo heshiiska lagu cayimey jadwalka 13aad, ma dhaqangelayaan ilaa **Xeer-nidaamiye** ama **Tilmaan** dhaqangelineysa heshiiska ama wax-ka-beddelka uu ka faafiyo Wasiirka.
88. **Xeer-nidaamiyeyaasha** iyo **Tilmaamaha** lagu xusey qaybtan waxaa ay shaqeynayaan ilaa uu ka beddelo ama uu wax-ka-beddel ku sameeyo Wasiirka Maaliyadda ama uu laalo sharci dowlad-goboleedka ama federaal.



Dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Soomaaliya
Xeerka Dakhliga ee Dowlad-goboleedka ee 2018
Jadwallada

Waxaa ay dhaqangelayaan laga bilaabo 1da Jannaayo
2018

Xeer-nidaamiyaha 9aad ee Dakhliga. Wax-ka-beddelka Jadwallada

1. Marka ay joogto baragaraafka 6(e) ee Xeerka Dakhliga Dowlad-goboleedka, waxaan toosinayaa ama wax-ka-beddelayaa jadwallada Xeerka Dakhliga Dowlad-goboleedka.
2. Qiimayaasha iyo shuruudahan jadwalladan ayaa shaqeynaya laga bilaabo 1da Jannaayo 2018ka.

Tusmo

Jadwalka 1aad. Qiyaaska Mushaarka iyo Dakhliga/libka Ganacsiga ee Sanadka (USD) 2

Jadwalka 2.1 Canshuurta Mushaarka iyo Dakhliga. Xaddiga la bixinayo sanad walba (USD) 3

Jadwalka 2.2 Canshuurta Mushaarka iyo Dakhliga/libka. Xaddiga loo biixnayo saddex-biloodle (USD) 3

Jadwalka 2.3 Canshuurta Mushaarka iyo Dakhliga/libka. Xaddiga lacagta la bixinayo bil walba (USD) 4

Jadwalka 3aad. Qiimaha/Nisbada Canshuurta laga qaadayo 5

Jadwalka 4aad. Shatiyada/Leysinada Sanadlaha ah ee Ganacsiyada (USD) 6

Jadwalka 8aad: Ujuurada/khidmadda Diwaangelinta Baabuurta..... 9

Jadwalka 9aad. Ganacsiyada sida tooska ah loogu baadi-soocayo in ay yihiin darajada A Q6 (11)..... 9

Jadwalka 12aad. Hay'adaha/Urrrada Canshuur-dhaafka loogu sameeyey Xeerkan 10

Jadwalka 13aad. Heshiisyada Gaarka ah ee Mideynta Canshuuraha iyo Kastamada. (Qaybta 30aad) 11

Jadwalka 1aad. Qiyaaska Mushaarka iyo Dakhliga/libka Ganacsiga ee Sanadka (USD)

Magaca	Mushaarka				libka (Dakhliga)			
	Heerka A	Heerka B	Heerka C	Heerka D	Heerka A	Heerka B	Heerka C	Heerka D
Dukaamo	42 000	21 120	7 680	0	68 000	34 000	14 000	0
Hoteellada la seexo	10 000	na	na	na	100 000	na	na	na
Hoteello leh makhaayad	12 000	50 000	30 000	0	150 000	50 000	20 000	0
Isgaarsiinta	60 000	na	na		300 000	na	na	na
Makhaayado	36 000	20 000	10 000	0	100 000	40 000	20 000	0
Sharikadaha Xawaaladaha	67 500	na	na	na	120 000	na	na	na
Sharikadaha Korontada	20 000	na	na	na	300 000	na	na	na
Warshadaha Biyaha	50 000	25 000	10 000	0	120 000	50 000	20 000	0
Shidaalka	20 000	na	na	na	60 000	na	na	na

Jadwalka 2.1 Canshuurta Mushaarka iyo Dakhliga. Xaddiga la bixinayo sanad walba (USD)

Ogow: Marka ay joogto Qaybta 4 (6)c xaddiga lacagta qoran ee la xiriira ganacsi Heerka A ah waa Canshuur-bixin ku-meelgaar ah.

Magaca	Canshuurta Mushaarka ee la bixinayo				Canshuurta Dakhliga/iibka ee la bixinayo			
	A Grade	B Grade	C Grade	D Grade	A Grade	B Grade	C Grade	D Grade
Dukaamo	840	422	154	0	1 360	680	280	0
Hoteellada la seexo	1 200	na	na	na	2 000	na	na	na
Hoteello leh makhaayad	1 600	1 000	600	0	3 000	1 000	400	0
Isgaarsiinta	1 200	na	na	na	6 000	na	na	na
Makhaayado	720	400	200	0	2 000	800	400	0
Sharikadaha Xawaaladaha	1 350	na	na	na	2 400	na	na	na
Sharikadaha Korontada	400	na	na	na	6 000	na	na	na
Warshadaha Biyaha	1 000	500	200	0	2 400	1 000	400	0
Shidaalka	400	na	na	na	1 200	na	na	na

Jadwalka 2.2 Canshuurta Mushaarka iyo Dakhliga/iibka. Xaddiga loo biixnayo saddex-biloodle (USD)

Ogow: Marka ay joogto Qaybta 4 (6)c xaddiga lacagta qoran ee la xiriirta ganacsi Heerka A ah waa Canshuur-bixin ku-meelgaar ah.

Magaca	Canshuurta Mushaarka ee la bixinayo				Canshuurta Dakhliga/iibka ee la bixinayo			
	Heerka A	Heerka B	Heerka C	Heerka D	Heerka A	Heerka B	Heerka C	Heerka D
Dukaamo	210	106	38	0	340	170	70	0
Hoteellada la seexo	300	na	na	na	500	na	na	na
Hoteello leh makhaayad	400	250	150	0	750	250	100	0
Isgaarsiinta	300	na	na	na	1 500	na	na	na
Makhaayado	180	100	50	0	500	200	100	0
Sharikadaha Xawaaladaha	338	na	na	na	600	na	na	na
Sharikadaha Korontada	100	na	na	na	1 500	na	na	na
Warshadaha Biyaha	250	125	50	0	600	250	100	0
Shidaalka	100	na	na	na	300	na	na	na

Jadwalka 2.3 Canshuurta Mushaarka iyo Dakhliga/libka. Xaddiga lacagta la bixinayo bil walba (USD)

Ogow. Marka ay joogto Qaybta 4(6)c xaddiga lacagta qoran ee la xiriirta ganacsi Heerka A ah waa Canshuur-bixin ku-meelgaar ah.

Magaca	Canshuurta Mushaarka ee la bixinayo				Canshuurta Dakhliga/iibka ee la bixinayo			
	Heerka A	Heerka B	Heerka C	Heerka D	Heerka A	Heerka B	Heerka C	Heerka D
Dukaamo	70	35	13	0	167	67	50	0
Hoteellada la seexo	100	na	na	na	167	na	na	na
Hoteello leh makhaayad	133	83	50	0	250	83	33	0
Isgaarsiinta	100	na	na	na	500	na	na	na
Makhaayado	60	33	17	0	167	67	33	0
Sharikadaha Xawaaladaha	113	na	na	na	200	na	na	na
Sharikadaha Korontada	33	na	na	na	500	na	na	na
Warshadaha Biyaha	83	42	17	0	200	83	33	0
Shidaalka	33	na	na	na	100	na	na	na

Jadwalka 3aad. Qiimaha/Nisbada Canshuurta laga qaadayo

Tiro taxan	Nooca Canshuurta	Nisbada/ Qiimaha Canshuurta	Sida loo bixinayo
1	Canshuurta Mushaaraadka Ganacsiga, NGO-yada iyo Sharikadaha.	2.00%	Mushaarka ama qiyaasta mushaarka sanadka
2	Canshuurta Dakhliga	2.00%	Dakhliga/iibka Sanadka ama Qiyaastiisa
3	Shatiyada/leysinada ganacsiga	Refer to schedule 4	
4	Canshuurka shidaalka	\$10.00	Weelka 200 litir qaada ee la soo iibsadaba.
5	Canshuurta dhalinta korontada ee laga qaado kuwa wadarta korontada ay soo saari karaan ay ka badan tahay 11KVA	\$40.00	KVA u rakiban ee uu soo saari karo sanadkiiba
6	Canshuurta Hantida Magaalooyinka		
7	Dhul degaan ah	\$30.00	Halkii boos ee magaalo ku yaalla sanadkii
8	Ganacsi Heerka A	\$360.00	Halkii boos ee magaalo ku yaalla sanadkii
9	Ganacsi Heerka B	\$200.00	Halkii boos ee magaalo ku yaalla sanadkii
10	Ganacsi Heerka C	\$100.00	Halkii boos ee magaalo ku yaalla sanadkii
11	Ganacsi Heerka D	\$0.00	Halkii boos ee magaalo ku yaalla sanadkii
12	Warshad	\$0.00	Halkii boos ee magaalo ku yaalla sanadkii
13	Beer	\$0.00	Halkii boos ee magaalo ku yaalla sanadkii
14	Ujuurada/khidmada nadaafadda iyo amniga suuqa	\$1.00	Halkii boos ee magaalo ku yaalla sanadkii
15	Ujuurada Rukhsadda Kheyraadka (Kalluumeysiga)	\$20.00	Doontiiba Sanadkii
	Ujuurada Rukhsadda Kheyraadka	\$0.00	
	Ujuurada Rukhsadda Kheyraadka	\$0.00	
16	Ujuurada Rukhsadda Baabuurta	Refer to schedule 8	

Revenue Regulation 9. Amendment of Schedules

17	Leysinada/Rukhsadaha darawallada	Refer to schedule 8	
18	Ujuurada/khidmadda Dal-ku-galka (Fiisaha)	\$50.00	
19	Ujuurada Fiisaha – Degganaansho Bille ah	\$150.00	
20	Ujuurada Fiisaha – Hal sano	\$1 200.00	
21	Canshuurta Dhoofka/bixidda Diyaarad	\$10	Heshiiska Wasiirrada
22	Canshuurta maalgelinta cusub	0.20%	Qiimaha maalgelinta cusub ee dhulka Dowlad-goboleedka
23	Canshuur Waddo-Marista	\$10.00	Halkii Tan oo ka mid ah Culeyska Guud ee Baabuurka
24	Canshuurta shaabadda	Refer to schedule 6	
25	Canshuurta Dakhliga Shakhsiga ah	\$3.00	Dakhliga mushaarka guud ee shaqaalaha rayidka ah ee dowladda
26	Jaadka (Jawaankii)	\$2.50	Jawaankii
27	Sigaarka/ Tubaako	\$0.60	Kartoonkii ay ku jirto 200 isteeg
		\$30.00	Kiishka ay ku jirto 50 baako ama 10,000 xabo oo sigar ah

Jadwalka 4aad. Shatiyada/Leysinada Sanadlaha ah ee Ganacsiyada (USD)

		Nooca Cabbirka ganacsiga				
	Nooca ganacsiga	A	B	C	D	E
1	Bakhaarro	50 0	300	200	Canshuur-dhaaf	Canshuur-dhaaf
2	Dukaamo	50 0	300	200	Canshuur-dhaaf	Canshuur-dhaaf
3	Barfuunnada/Alaabada is-qurxinta	50 0	300	200	Canshuur-dhaaf	Canshuur-dhaaf
4	Farmashiyeyaal	50 0	300	200	Canshuur-dhaaf	Canshuur-dhaaf
5	Qalabka dayactirka baabuurta	50 0	300	200	Canshuur-dhaaf	Canshuur-dhaaf
6	Qalabka korontada	50 0	300	200	Canshuur-dhaaf	Canshuur-dhaaf

Revenue Regulation 9. Amendment of Schedules

7	Harqaanlayaal	12 0	60	30	Canshuur- dhaaf	Canshuur- dhaaf
8	Cuntada fudud/ Cabitaannada qabow	10 0	50	20	Canshuur- dhaaf	Canshuur- dhaaf
9	Sharikadaha Korontada	50 00	Waa mamnuuc	Waa mamnuuc	Canshuur- dhaaf	Canshuur- dhaaf
10	Is-gaarsiinta	50 00	Waa mamnuuc	Waa mamnuuc	Canshuur- dhaaf	Canshuur- dhaaf
11	Warshadaha yaryar	15 00	1000	500	Canshuur- dhaaf	Canshuur- dhaaf
12	Sharikadaha Xawaaladaha	50 00	300	200	Canshuur- dhaaf	Canshuur- dhaaf
13	Garaashyada	25 0	Waa mamnuuc	Waa mamnuuc	Canshuur- dhaaf	Canshuur- dhaaf
14	Matoorrada korontada dhaliye	10 00	800	600	Canshuur- dhaaf	Canshuur- dhaaf
15	Makhaayadaha	50 0	300	200	Canshuur- dhaaf	Canshuur- dhaaf
16	<i>Super Market</i> -yada	50 0	300	200	Canshuur- dhaaf	Canshuur- dhaaf
17	Leysinada wadista baabuurta	12 0	Waa mamnuuc	Waa mamnuuc	Canshuur- dhaaf	Canshuur- dhaaf
18	Hoteellada	10 00	500	300	Canshuur- dhaaf	Canshuur- dhaaf
19	Sharikadaha adeegga – Is-gaarsiinta, Bankiyada, Biyaha, Korontada	50 00	Waa mamnuuc	Waa mamnuuc	Canshuur- dhaaf	Canshuur- dhaaf
20	Leysinada Dhoofinta iyo Soo-dejinta	50 0	Waa mamnuuc	Waa mamnuuc	Canshuur- dhaaf	Canshuur- dhaaf
21	NGO-yada Degaanka/Maxalliga ah	50 0	Waa mamnuuc	Waa mamnuuc	Canshuur- dhaaf	Canshuur- dhaaf
22	NGO-yada Caalamiga ah iyo Sharikadaha Maalgelinta	10 00	Waa mamnuuc	Waa mamnuuc	Canshuur- dhaaf	Canshuur- dhaaf
23	Sharikadaha Dhismaha	10 00	Waa mamnuuc	Waa mamnuuc	Canshuur- dhaaf	Canshuur- dhaaf

Jadwalka 5aad. Ciqaabaha iyo Ganaaxyada

Dembiga	Ciqaabta/Ganaaxa	Daliilka
Canshuurta oo la bixin waayo	10% bishii	q9, faq. 16
In aan Canshuur-celinta la soo gudbin taariikhdii ugu dambeysey oo la rabey in la soo gudbiyo.	10% bishii	Xeer-nid. 3
Been laga sheego Canshuur-celinta Canshuurta waajibtey ama lagu sameeyo foomka diiwaangelinta	\$1000	Xeer-nid 3
Hawl la qabto iyada oo aan la sameyn diiwaangelintii loo baahnaa.	\$5000	Faq. 52
Diyaarin la'aanta dokumentiyada/rikoodhada waajibka ku ahaa diyaarintooda.	\$5000, In diiwaanka laga tiro	Xeer-nid 4, Q4
Hawlgelinta bar-kantarool oo dakhli lagu qaado oo aan loo haysan oggolaansho sax ah	\$5000	
In la diido iskaashi lala sameeyo kuwa sahanka sameeya ama in meel muuqato lagu dhejiyo lambarka booska dhulka ee laga rabey.	\$100	Xeer-nid 8, q5
Ku shaqeynta ganacsi shidaal ama koronto isdiiwaangelin la'aan.	\$1000	Xeer-nid 6, q4
Iskuday soo dhoofin Jaad isdiiwaangelin la'aan	2 sano ah xabsi ah	Xeer-nid 10 q3
Iskuday soo-dhoofin Qaad goob aan loo oggolaan sida uu dhigayo xeer-nidaamiyaha 10.	2 sano ah xabsi ah.	Xeer-nid 10 q10
Iskuday qaadis Canshuuro ama dakhli kale oo dowladed iyada oo aan loo haysan oggolaansho sax ah	2 sano ah xabsi ah.	Xeer-nid 64
Diiwaangelin la'aan baabuur iyo bixin la'aanta lacagta diiwaangelinta.	10% bishii	Xeer-nid 36(b)
Ka-shaqeynsiinta bar kantarool oo aan oggolaansho sax ah loo haynin	2 sano ah xabsi ah.	Xeer-nid 7, q5

Jadwalka 6aad: Lacagaha shaabadda (*Stamp duties*)

Nooca Dokumentiga	Boqolleyda qiimaha
Qaan-sheeg	2%
Mushaar	1%
Dakhli	2%
Waraaq lahaansho dhuleed	1%

Jadwalka 7aad. Lacagaha kastamka

Eeg Sharciga Kastamka ee u Habboon

**Jadwalka 8aad:
Ujuurada/khidmadda
Diiwaangelinta Baabuurta**

Nooca Baabuurta	Ujuurada/khidmadda taargaha	Ujuurada/Khidmadda Buugga Baabuurka	Ujuurada Rukhsadda Sanadlaha ah
Baabuurta Waaweyn (<i>Trucks</i>)	200	120	120
Baabuurta Raaxada (<i>Luxury Cars</i>)	200	120	150
Makiinnadaha dhulka qoda iyo wiishashka	200	120	120

Jadwalka 9aad. Ganacsiyad sida tooska ah loogu baadi-soocayo in ay yihiin darajada A Q6 (11)

Tiro taxan	Nooca ganacsiga
1	Hoteellada sare ee jiiifka ee lagu qiimeeyo in ay yihiin 3, 4 ama 5 xiddigood
2	Sharikadaha isgaarsiinta ee iibkoodu sanadku uu ka badan yahay USD 12 milyan
3	Sharikadaha xawaaladaha ee caalamiga ah

4	Koronto bixiyeyaasha iibkooda sanadka uu ka badan yahay USD 4 milyan.
5	Warshadaha biyaha ee iibkooda sanadka uu ka badan yahay USD 4 milyan
6	Shidaal-qaybiyeyaasha uu iibkoodu ka badan yahay 20 barmiil (200 litir) maalintii.
7	Bankiyada Caalamiga ah
8	Ganacsiyada ama shakhsiyaadka laga kireysto meel la seexdo.
9	Ganacsiyada ma shakhsiyaadka baabuurta laga kireysto .
10	Sharikadaha caalamiga ah.

Jadwalka 10aad. Ujuurooyinka/khidmadda Garoonka Diyaaradaha (USD)

Tiro Taxan	Nooca	Tirada Kuraasta	Ujuurada Soo-degista (Caadi)	Ujuurada Soo-degista (VIP)	Ujuurada Diyaarad-dhigashada (Parking Fees)	Ujuurada rakaabka halkii tikit
1	A	100	600	700	40	10
2	B	50	300	400	30	10
3	C	30	200	300	20	20
4	D	20	135	250	10	20

Jadwalka 11aad: Ujuurooyinka/khidmadaha Dekadda

Jadwalka ujuurooyinka waxaa bixinaya Maamulka Dekadda.

Jadwalka 12aad. Hay'adaha/Ururrada Canshuur-dhaafka loogu sameeyey Xeerkan

Tiro taxan	Magaca Hay'adda/Ururka	Lambarka Aqoonsiga (TIN number)	Taariikhda la siiyey Canshuur-dhaafka	Lambarka shahaaddada Canshuur-dhaafka
1				

Revenue Regulation 9. Amendment of Schedules

2				
3				
4				
5				
6				
7				

Jadwalka 13aad. Heshiisyada Gaarka ah ee Mideynta Canshuuraha iyo Kastamada. (Qaybta 30aad)

Tiro taxan	Magaca gaaban ee heshiiska	Taariikhda heshiiska	Goobta
1	Heshiiska Midaynta Canshuuraha iyo Hanaanka Shaqo ee Furdooyinka	27 ^{ka} Sebtembar 2017	Garowe
2			
3			

Jamhuuriyada Federalka Soomaaliya
Dowlad Goboleedka Hirshabeelle
Xafiiska Madaxweynaha



Federal Republic of Somalia
Hirshabelle State
Office of the President

Ref: DGHSH/XMM/N/0121/18

Tr: 19/03/2018

XEER MADAXWEYNE Lr 121

Madaxweynaha Dowlad goboleedka hirshabeelle markii uu arkay qodobka 51aad farqadiisa 12aad ee dastuurka dowlad goboleedka Hirshabeelle.

Markii uu arkay baahida loo qabo in la helo sharcyo iyo xeerar lagu Maareeyo Maaliyadda Dadweynaha, xeer daqli iyo xeernidaamiyeyaashiisa, iyo in la helo xeer lagu dhiso Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Dowlad goboleedka Hirshabeelle.

Markii uu arkay qaraarka baarlamaanka uu soo saaray 18/02/2018 ee uu tirsigiisa yahay **GSHDDGHSH/003/18** ee ku aadaanaa ansixinta sharciga Dakhliga iyo xeernidaamiyeyaasha 9aad 2018 iyo kan kale ee la soo saaray isla taariikhdaas ee uu tirsagliisa yahay **GSHDDGHSH/004/18** ee ku aadan ansixinta sharciga lagu dhisayo wasaaradda maaliyadda 2018 iyo sharciga kale ee lagu ansixiyey sharciga maareynta Maaliyadda Dadweynaha 2018 oo isna tirsigiisa yahay **GSHDDGHSH/005/18** ee la soo saaray taariikh 05/03/2018.

Madaxweynaha dowlad goboleedka hirshabeelle waxa uu xeeriyey in qaraarada baarlamaanka ee

1. Sharciga Dakhliga Iyo Xeernidaamiyeyaasha 9aad 2018
2. Sharciga Lagu Dhisayo Wasaaradda Maaliyadda 2018
3. Sharciga Maareynta Maaliyadda Dadweynaha 2018

loo bedelo xeer madaxweyne maanta oo ay taariikhda tahay 19/03/2018
xeer lambar 121

Maxamed Cabdi Waare

Madaxweynaha Dowlad Goboleedka Hirshabeelle





Federal Republic of Somalia
Hirshabelle State
Office of the Vice President

Ref: DGSHS/XMKX/0018/018

Tr: 06/02/2018

Ku: Guddoonka Baarlamaanka Dowlad G. Hirshabeelle

"Jowhar"

Og: Madaxweynaha Dowlad Goboleedka Hirshabeelle

"Jowhar"

Ujeeddo: Codsii "Ansaxin Hindise Sharciyeedyo dhowr ah"

Mudane Guddoomiye,

Waxaan si xushmad leh idinkaga codsanaynaa in la ansaxiyo Hindise Sharciyada hoos ku qoran kuwaas oo Wasiirka Maaliyada iyo Horumarinta Dhaqaalaha uu soo hordhigay Kalfadhiga Golaha Wasiirada DGSHS taariikhdu markay ahayd 05/02/2018.

- 1- Xeerka lagu dhisyo Wasaarada Maaliyada & Horumarinta Dhaqaalaha
- 2- Xeerka Dhakhliga
- 3- Xeerka Maareynta Maamulka Maaliyad/dadweynaha

Golaha Wasiirada Dowlad Goboleedka Hirshabeelle waxay cod aqlabiyad leh ku ogolaadeen isla taariikhda aan soo sheegnay "Hindise Sharciyeedyada kor ku xusan".

Haddaba anagoo tixgelinayna horumarinta nidaamka Dowliga ah iyo dardar gelinta shaqooyinka kala duwan ee looga fadhiyo Dowlad Goboleedka Hirshabeelle, waxaan Guddoonka Baarlamaanka DGSHS ka codsanaynaa in la horgeeyo Golaha barlamaanka Hindise sharciyeedaas si loo ansaxiyo.

Mahadsandiin

Mudane Cali C/laahi Xuseen (Cali guudlaawe)

Madaxweyne ku xigeenka Dowlad Goboleedka Hirshabeelle





Ref/012

February 18,2018

Jamhuuriyada Federalka Somalia

Golaha Sharci Dejinta Dowlad Goboleedka Hirshabelle

Guddiga maaliyada, Qorsheynta iyo Tirakoobka

Warbixinta Guddiga Maaliyada ee Hindise
sharciyeedyada

- Xeerka Dakhliga, Xeernidaamiyaha 9aad
{Jadwal}
- Xeerka lagu dhisayo wasaarada Maaliyada
hayadaha Canshuur uruurinta iyo arrimo kale
ee laxiriira



Horudhac

odoroska Hindise sharciyeyadaan 2018 waa hindise sharciyeedkii 1aad ee uu falanqeeyo Guddiga Maaliyada Qorsheynta iyo Tirakoobka Golaha Sharci dejinta Dowlad Goboleedka Hirshabelle

Sida kuxusan Qodobka 45aad Faqrada 11 Xeer hoosadka Golaha. Guddigu wuxuu u xilsaaran yahay isagoo wakiil uga ah Baarlamanka Arrimaha Maaliyada iyo Miisaniyada

Guddiga isagoo si guud oo dhameystiran u eegaya Hindise sharciyeedyada ay soo Gudbisay wasaarada Maaliyada Tixgeliyeyna soo jeedimihii Baarlamanka wuxuu Dulmar guud kusameyay kana baaran degay odoroska Hindisedyada ay soo gudbisay Wasaarada Maaliyada 2018 oo loo soo gudbiyey Baarlamanka laguna wareejiyey Guddiga 10.02.2018

Hindise sharciyeedka

Hindise sharciyeyadaan ayaa dib loo eegay waxaana la isla gartay in Qodobada Qaarkood Toosin lagu sameeyo sidoo kalena Qodob kamid ah Meshaha laga saaro Hadaba meelaha wax kabadelka lagu sameyay waxaa kamid ah Qodobada Hoos Kucad

Qaybta 1aad Bogga 4aad, Faqrada 1aad

.xeerka waxaa lugu magacaabi karaa "xeerka Dakhliga Dowlad-goboleedka ee 2017"

waxaan ku bedelnay meesha 2017 ah 2018.

Qaybta 2aad Bogga 4aad Faqrada 2aad

ereyada ujuuro iyo khidmo waa in lugu badalaa ereyga canshuur.

Qaybta 3aad Fasiraad page 6aad, "xeer- nidaamiye"

Xeer Nidaamiye waa xeer la diidi karo oo bixinaya xeerar faahfaahsan oo uu diyaariyo uuna soo saaro Wasiirka maaliyadda si loogu howlgeliyo waxyaabaha uu dhigayo xeerkan. xeer nidaamiyayaashan waa kuwo ay



waajib tahay in loo hogaansamo laakiin ma aha xeer uu soo saaray baarlamaanka.

Guddiga waxuu u arkaa xeer uusan baarlamaan soo saarin sharci ma ahan sidaas dateed waxaa loo bedelay Xeer Nidaamiye oo bixinaayo xeerar faahfaahsan oo ay soo diyaariso wasaarada maaliyada uuna ansixiyo Baarlamaanka si loogu howgeliyo waxyaabaha uu dhigayo xeerkan. Xeer Nidaamiyayaashan waa kuwo waajib tahay in loo Hogaansamo laakin ma aha xeer uu soo saarayo Wasaarada ama Wasiirka Maaliyada .

Qabta 5aad page 7aad Faqrada 3aad

Racfaan:ganacsi lugu baadi soocay inuu yahay heerka B C D ama E waxa uu racfaan ka qaadan karaa lacagta la saaray isaga oo bixinaya bayaan lagu kaabay qoraallo/dokumintiyo la caddeeyay.Racfaan waa in loo sameeyo si waafaqsan Qeybta 6B.

Waa inuu wasiirka faahfaahin ka bixiyaa qaabka heyb sooca iyo cida racfaanka laga qaadanaayo iyo meesha racfaanka loo qaadanaayo?.

Qabta 7aad Page 9aad, Faqrada 7aad Canshuurta Dhaafka iyo Cabirka ugu hooseya

urur aasaasi ahaan loo abuuray hadaf cibaado diimeed,oo ay ka mid yihiin masaajida,kanisadaha macaabidda.

Guddiga Joogtada waxuu soo jeediyey in Gabi ahaanba meesha laga saaro Faqrada 7aad ee qodobkan maadaama ay suurto gal aheyn in dhulkeena aan laga dhisi karin goobo cibaado oo an aheyn kuwa ay muslimiinta ku cibaadeystaan

sidoo kalena ay macquul aheyn in Goobaha Cibaadada muslimiinta laga qaado canshuur

sidaas darteed waxaan soo jeedineynaa in qodobkaas meesha laga saaro maadama dhulkeena uu yahay dhul islaam aanan lagu dhaqmi karin Diin aan aheyn Diinta Islaamka



Qaybta 9aad Bogga 11aad Faqrada 20aad. Bixinta Canshuuraha

Wasiirka ayaa isaga oo adeegsanaya Xeer Nidaamiye waxaa uu deegaan gaar ah oo ka mid ah dhulka dowlad goboleedka hirshabeelle ee somaliya ka dhigi karaa kuwo "xiran"muddo cayiman,sababo la xiriira cimilada,amniga ama xaalado deg deg ah oo loogu dhawaaqay si waafaqsan shuruucda u habboon daradood.dhamaan canshuuraha dakhliga/iibka iyo canshuuraha musharaadka lama bixinayo muddadan la cayimay.

Wasiirka ayaa isaga oo adeegsanaya Oggolaanshaha Baarlamaanka waxaa uu deegaan gaar ah oo ka mid ah dhulka dowlad goboleedka hirshabeelle ee somaliya ka dhigi karaa kuwo "xiran"muddo cayiman,sababo la xiriira cimilada,amniga ama xaalado deg deg ah oo loogu dhawaaqay si waafaqsan shuruucda u habboon daradood.dhamaan canshuuraha dakhliga/iibka iyo canshuuraha musharaadka lama bixinayo muddadan la cayimay.

IkN Wasiirka awood uma lahan inuu deegaan cashuur ka joojiyo hadii eey sababo gaar ah yimaadaan waa in baarlamaanka la horkeenaa.Oggolaanshana laga helaa

Qaybta 15aad Bogga 13aad Faqrada 2aad

Hadii qofka milkiilaha uu maqan yahay,qofka eey u kireeysan tahay ama qofka deggan hantida ayaa bixinaya Lacagta waxaana uu lacagtaa uu ku bixiyey kareeban karaa kirada u sugnaatay mulkiilaha,ama waxa uu milkiilaha weydiisan karaa inuu lacagtii uu bixiyey usoo celiyo

Guddigu wuxuu kadhigay Hadii qofka milkiilaha uu maqan yahay,qofka eey u kireeysan tahay ama qofka deggan hantida ayaa bixinaya cashuurta.intaas ayaa ku filan inta kale waa in laga tiraa.

Qaybta 25aad Bogga 20aad NO:7 Wakiillada Dakhli Ururinta ee la aqoon san yahay

Cid kasta oo kale oo uruurisa dakhli eey wakiil uga tahay dowlada hadafka ladoono ha laga lahaadee.

Guddigu waxuu u gartay in Qodobkan sidiisaba meesha laga saaraa.

Qodobka 19aad Bogga 16aad, Faqrada 4aad

Si ay u u caddeeyaan in la bixiyey lacagta ujuurada shatiga/laysinka Dowlad Goboledka ama Maamulka Dowladaha Hoose waa inay soo saaran shati/leysin Nambeareysan oo loogu talagalay nooc kasta oo kheyraad ah oo lala soo baxo ama lagoosto

Guddigu waxuu soo jeedinaya in sidaan loo bedelo Si ay u u caddeeyaan in la bixiyey lacagta ujuurada shatiga/laysinka Dowlad Goboledka waa inay soo saaran shati/leysin Nambeareysan oo loogu talagalay nooc kasta oo kheyraad ah oo lala soo baxo ama lagoosto

Qaybta 22aad Faqrada 52aad Qaybta 23aad faqrada 55aad Bogga 18aad

Guddiga wuxuu u arkaa ereyga tacriif in lagu bedelo tariifo

Xeerka dakhliga jadwalka.

Jadwalka 1aad: qiyaasta mushaharka iyo dakhliga ganacsiga Sanadka

Guddigu waxuu soo jeedinaya in Dukaamo,loo kala saraa nooca eey yihiin Dukaamada .

Guddigu waxuu faraya wasarada in lagu daro lafdhabarka dhaqaalaha hirshabelle oo eey ka mid yihiin

1. xoolaha,
2. saamaha
3. beeraha,iyo mirahooda,
4. warshadaha beeraha ee farsmaeeya miraha beeraha,
5. dakhliga dhakhaatiirta iyo mushaarka eey bixiyaan,
6. kalluumeysiga iyo warshadahiisa,
7. timajaraha.

Jadwalka 3aad iyo 4aad, 5aad, 8aad:

Guddigu waxuu soo jeedinayaa inuu wasiirka sharaxaad dheeri ah ka bixiyaa jadwalkaan aan Qodobadiisa kor kuxusan .

